

Na soo booqo!

Xafiiska soo dhoweynta:

Tingvallavägen 33 2tr,
461 32 Trollhättan

Adarees booqasho:

Lyrfågelskolan, Hagtornsstigen 16
461 43 Trollhättan
Tel. 0520-49 79 95, 49 79 96

Nala soo xiriir!

Gacan yarahaa xafiiska soo dhoweynta:

Nina Björklund, tel. 0520-49 78 92
E-post: nina.bjorklund@trollhattan.se

Madaxa howgalka:

Carina Halvorsen, tel. 0520-49 73 77
E-post: carina.halvorsen@trollhattan.se

Madaxa eeriyada:

Birgitta Lundskog, tel. 0520-49 64 50
E-post: birgitta.lundskog@trollhattan.se

Ka aqriso wax badan oo ku

saabsan Välkomsten

www.valkomsten.se



REKLAMJÄNST AB, THNI | FOTOGRAF: ANDREAS GLEISNER | 2016



Trollhättans Stad

www.valkomsten.se



- ny i svenska skolan
ÄLKOMSTEN

Välkomsten - qofka ku cusub iskuulka iswiidhishka!

Välkomsten waa waaxda soo dhoweynta ardayda ku cusub iskuulka iswiidhishka ee magaalada Trollhättan. Ujeedada Välkomsten waa in dhamaan ardayda ku cusub dalka ee ka bilaabaya iskuul Trollhättan ay helaan bilow wanaagsan ee iskuul.

Shaaqalaha Välkomsten ayaa dersaya aqoonta asaasiga ee ardayga, wuxuu ku wanaagsan yahay, wuxuu xiiseeyo iyo wuxuu karo.

Dersidda ayaa sal u ah kadib si loo helo warbarasho baahi tirta baahida ardayga.



Tag Välkomsten

Välkomsten waxey ka howl-gashaa golayaasha iskuulka Lyrfågelskolan ee bariga eeriyada iskuulka ee Trollhättan. Välkomsten waxey diyaar ula tahay ardayda u baahan gaari iskuulka geeya.

Is qorid

Kulanka koowaad ee ardayga iyo Välkomsten wuxuu dhacayaa iyadoo la booqanayo macalin bulsho oo soo bandhigayo waxqabadka. Booqashadaa ayaa ardayga iyo mas'uulkiisu ku helayaan warbixininta iyo fursad barasho be'yadda iyo saaxiibada iyo fursad ay su'aalo ku weydiin karaan ku saabsan bilowga iskuulka. Isniinta ku xigta kulanka ayuu ardaygu bilaabayaa Välkomsten.

Deraasid

Välkomsten waxa ka shaqeeyaa macalinka koo-waad, macalin caadi ah, gacan-yare waxbarasho, macalin bulsho iyo kalkaaliso caafimaad. Kalkaalisaada caafimaad ee Välkomsten ayaa la kulmeysa ardayga si loo baaro caafimaadkiisa iyadoo la bilaabayo wada hadal caafimaad. Mudada la joogo Välkomsten ayaa la sameynayaan dersidda ardayga ee aqoontiisa asaasiga, wuxuu ku wanaagsan yahay, wuxuu xiiseeyo iyo wuxuu karo. Dersidda ayaa laguu sameeyaa afka uu ardaydu sida wanaagsan ugu hadlo. Dersidda ayaa sal u ah kadib si loo helo warbarasho baahi tirta baahida ardayga.

Dersidda waxa barbar socda oo ay Välkomsten bixineysaa waxbarasho asaasi ah ee maadooyinka bulshada.

Sii dhigasho iskuul

Maadaama ay Iswiidhen ka jirto xuriyadda doorashada iskuulka ardaygu doonayo ayaa sidoo kale Trollhättan waxa arday kastaa xaq u leeyahay in boos ka dalbado iskuulka uu doono.

Ardaygu wuxuu boos la hubo ku leeyahay iskuulka xaaafadiisa, taasoo loola jeedo iskuulka ugu dhow guriga. Iskuulada kale waxey ardayga qaataan haddii ay boos u hayaan.

Warbixin badan ee doorashada iskuulka iyo shuruucda waxad ka aqrisan kartaa bogga internetka ee magaalada Trollhättan : www.trollhattan.se

Bogga internetka ee Trollhättan waxad kaloo ka heleysaa warbixin intaa dheer ee iskuulada Trollhättan, meesha ay ku yaalaan iyo sida ay u shaqeeyaa

Marka ardaygu bilaabo iskuulka waxa shaqaalaha Välkomsten ay la xiriirayaan iskuulka si loo bilaabo ku wareejinta dersidda iyo baaritaanka caafimaad. Iskuulka qaabilaya ardayga ayaa qorsheynaya waxbarashada ardayga iyagoo u eegaya dersidda.

